



# La tallaalay. Soo qaado taleefankaaga casriga ah. Bilaw v-safe.

## Waa maxay v-safe?

**v-safe** waa barnaamij taleefanka casriga ah ku shaqeeya oo isticmaala farriimo qoraal ah iyo xogururino webka ah si uu u bixiyo xog caafimaad oo la khaasyeelay kadib markii aad qaadato tallaalka COVID-19. Adigoo adeegsanaya **v-safe**, waxaad si dhakhso ah ugu sheegi kartaa CDC haddii aad leedahay wax saamayno xun ah kadib qaadashada tallaalka COVID-19. Iyadoo ku xiran jawaabahaaga, qof ka socda CDC ayaa kula soo xiriiri kara. Oo **v-safe** waxay ku xasuusin inaad qaadato marqaadashada labaad ee tallaalka COVID-19 haddii aad u baahan tahay.

Kaqaybqaadashada v-safe-ta **CDC** faa'ido ayey leedahay — waxay caawisaa in tallaalka COVID-19 ay ahaadaan qaar badbaado leh.

## Sideen uga qaybqaadan karaa?

Markii aad qaadato tallaalka COVID-19, waxaad iska diiwaangalin kartaa **v-safe** adigoo isticmaalaya taleefankaaga casriga ah. Kaqaybqaadashadu waa iskaa waanad joojin kartaa markii aad doonto. Waxaad ka heli doontaa farriimo qoraal ah **v-safe** qiyaastii 2 duhurnimo wakhtiga deegaanka. Si aad u joojiso, farriinta "STOP" dir markii **v-safe** ay kuu soo dirto farriin qoraal ah. Sidoo kale waad bilaabi kartaa **v-safe** marlabaad adigoo farriinta "START" diraya.

## Muddo intee leeg ayey xog gudbinta v-safe socon doontaa?

Inta lagu jiro toddobaadka koowaad kadib markii aad tallaalka aad qaadatay, **v-safe** waxay kuu soo diri doontaa farriin qoraal ah maalin kasta si ay kuu waydiiso sida aad tahay. Markaa waxaad heli doontaa farriimo xog-doon ah toddobaadkii halmar muddo 5 toddobaad ah. Su'aalaha **v-safe** uu ku waydiinayo waxay qaadan doonaan wax ka yar 5 daqiiqo inaad ka jawaabto. Haddii aad u baahan tahay marqaadashada labaad ee tallaalka, **v-safe** waxay bixin hannaan xog-doon oo cusub oo 6 toddobaad ah markaa waad la wadaagi kartaa wixii aad kala kulanto marqaadashada labaad sidoo kale. Sidoo kale waxaad heli doontaa farriimo xog-doon 3, 6, iyo 12 bilood kadib markii aad qaadatay marqaadashada tallaalka.

## Macluumaadkayga caafimaad ma badqabaa?

Haa. Macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed ee **v-safe** waa dhawrsan yahay markaa wuxuu ahaan mid qarsoodi ah oo asturan.\*

\*Ilaa xadka **v-safe** isticmaasho nidaamyada macluumaadka ee jira ee ay gacanta ku hayaan CDC, FDA, iyo hay'adaha kale ee fadaraalku, nidaamyadu waxay leeyihiin tallaabooyin ammaan oo adag oo ku habboon heerka xasaasinimada xogta. Tallaabooyinkani waxay ku dhaqmaan, halkii ay khusayso, shuruudda fadaraalka ee soo socda, oo ay kujiraan Xeerka Astumaanta ee 1974; heerarka la ansixiyey ee waafaqsan Xeerka Lahaanshaha Caymiska Caafimaadka iyo Isla-Xisaabtanka ee 1996 (Health Insurance Portability and Accountability Act of 1996 (HIPAA)); Xeerka Maaraynta Ammaanka Macluumaadka Fadaraalka, iyo Xeerka Xorriyadda macluumaadka.



**v-safe**<sup>SM</sup>  
after vaccination  
health checker

Isticmaal taleefankaaga casriga ah si aad ugu sheegto CDC wixii saamayno xun ah kadib qaadashada tallaalka COVID-19. Sidoo kale waxaad heli doontaa xasuusiyayaal haddii aad u baahato marqaadashada labaad ee tallaalka.



**Ka diiwaangali barawsarka  
taleefankaaga casriga ah**  
[vsafe.cdc.gov](https://vsafe.cdc.gov)

**AMA**

**Ku jeedi kamarada  
taleefankaaga  
casriga ah code-kan**




# Sida la isku diiwaangaliyo loona isticmaalo v-safe

Waxaad u baahan doontaa taleefankaaga casriga ah iyo macluumaad kusaabsan tallaalka COVID-19 ee aad qaadatay. Macluumaadkan waxa laga heli karaa kaarkaaga diiwaanka tallaalka; haddii aad waydo kaarkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

## Isdiiwaangali

1. Booqo **websaytka v-safe** adigoo isticmaalaya mid kamid ah ikhtiyaarada hoose:



2. Akhri tilmaamaha. Guji **Get Started**.
3. Gali magacaaga, lambarkaaga taleefanka, iyo macluumaadka la codsado ee kale. Guji **Register**.
4. Waxaad ku heli doontaa taleefankaaga casriga ah farriin qoraal ah oo wadata code-ka xaqiijinta. Gali code-ka **v-safe** oo guji **Verify**.
5. Xagga sare ee shaashadda, guji **Enter your COVID-19 vaccine information**.
6. Dooroo nooca tallaalka COVID-19 ee aad qaadatay (waxaad ka helaysaa kaarkaaga diiwaanka tallaalka; haddii aad waydo kaarkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka). Kadibna gali taariikhda lagu tallaalay. Guji **Next**.
7. Dib u eeg macluumaadkaaga tallaalka. Haddii uu sax yahay, guji **Submit**. Haddii aanu sax ahayn, guji **Go Back**.
8. **Hambalyo! Waad dhammaysay gabi!** Haddii aad dhammaystirto isdiiwaangalintaada kahor 2 duhurnimo wakhtiga deegaanka, **v-safe** waxay bilaabi xog-doonka caafimaadkaaga ee ugu horreeya qiyaastii 2 duhurnimo maalintaas. Haddii aad isdiiwaangaliso kadib 2 duhurnimo, **v-safe** waxay bilaabi xog-doonka caafimaadkaaga ee ugu horreeya kadib isla marka aad isdiiwaangaliso — adigu tilmaamaha uun raac.

Waxaad ka heli doontaa farriin qoraal ah oo xasuusin ah **v-safe** markii ay gaarto wakhtigii xigay ee xog-doonka caafimaadkaaga — qiyaastii 2 duhurnimo wakhtiga deegaanka. Adigu guji linkiga farriinta qoraalka ah si aad u bilawdo xog-doonka.

## Dhammaystir xog-doonka caafimaadka ee v-safe

1. Markii aad ku hesho **v-safe** farriintiisa qoraalka ah ee xog-doonka taleefankaaga casriga ah, guji linkiga markuu diyaar yahay.
2. Raac tilmaamaha si aad u dhammaystirto xog-doonka.

## Cillad-saarka

**Sidee ayaan dib ugu soo laaban karaa oo aan u dhammaystiri karaa xog-doonka mar dambe haddii wax iga soo dhexgalaan?**

- Guji linkiga xasuusiyaha farriinta qoraalka ah si aad dib ugu bilawdo oo aad u dhammaystirto xog-doonkaaga.

**Sidee ayaan u cusboonaysiin karaa macluumaadkayga tallaalka kadib marqaadashadayda labaad ee tallaalka COVID-19?**

- **V-safe** ayaa si otomaatig ah u cusboonaysiin doonta macluumaadkaaga marqaadashada labaad. Adigu raac uun tilmaamaha.

**Caawimo ma ugu baahan tahay v-safe?**

Wac 800-CDC-INFO (800-232-4636)

TTY 888-232-6348

Furan 24 saacadood, 7 maalmood

toddobaadkii. Booqo

[www.cdc.gov/vsafe](https://www.cdc.gov/vsafe)

